




NIRA
NATIONAL IDENTIFICATION &
REGISTRATION AUTHORITY
HAY'ADDA AQOONSIGA IYO DIIWAANGELINTA QARANKA

WARGAYSKA BILLAHA AH



**AQOONSIGA, DHALLINYARADA,
IYO MUSTAQBALKA**

Sebteembar 2025

Nuqulka #2



**Cabdiweli Cali
Cabdulle (Timacadde)**

Maareeyaha Guud, NIRA



**Maalinta Aqoonsiga
Adduunka**



Gogol-dhigga Maareeyaha Guud

Akhriste, ku soo dhowoow Nuqulka bisha Sebtembar ee Wargeyska Billaha ah ee NIRA, oo hal-ku-dhiggiisu yahay: “Aqoonsiga, Dhallinyarada, iyo Mustaqbalka.”

Bishan waxaanu ku tallaabsannay horumar muuqda oo ku aaddan hirgelinta iyo baahinta Nidaamka Aqoonsiga Qaranka ee Soomaaliya. Kumannaan qof oo Soomaaliyeed ayaa bil walba is-diiwaangeliya, iyada oo ay tiradu mar walba si xawli ah u kordhayso, taas oo ka turjumaysa wacyiga bulshada ee sii xoogaysanaya.

Tan iyo markii si rasmi ah loo daahfuray Nidaamka Aqoonsiga Qaranka bishii Sebtembar ee sannadkii 2023, NIRA waxay diiwaangelisay in ka badan nus milyan qof oo ku fiiqsan guud ahaan dalka. Si aan u joogtayno dardarta diiwaangelinta, waxaannu maalgelin ku samaynay agabka diiwaangelinta iyo daabacaadda kaarka; xoojinnay wacyigelinta dadweynaha, annaga oo sidoo kalena xarumo diiwaangelin ka hirgellinay gobollada dalka oo dhan.

Adeegga Aqoonsiga Qaranka waxa kale oo la gaarsiiyay 30 safaaradood oo Soomaaliyeed oo dalka dibaddiisa ah, iyada oo Aqoonsiga si rasmi ah loogu xiray adeegyada kala duwan sida waxbarashada, bangiyada, baasaboorrada, shatiyada ganacsiga, iyo safarrada gudaha—taasoo Kaarka ka dhigtay mid fure u ah fursadaha iyo adeegyada aasaasiga ah ee muwaaddin kasta. Waxaannu garawsannahay in daahfurnaantu ay lagama-maarmaan u tahay kalsoonida dadweynuhu ku qabo Nidaamka Aqoonsiga Qaranka.

Sidaasi awgeed, NIRA waxa ay mudnaan weyn siisaa isla-xisaabtanka iyo hufnaanta—annaga oo tixgelinna cabashada iyo aragtida shacabka, ka falcelinna su'aalhooda, una kuur-galna baahiyahooda. Toddobaadyadii la soo dhaafay waxaan qabannay kulammo dadweyne oo kala duwan, kuwaas oo diiradda lagu saarayay muhiimadda Aqoonsiga iyo sida uu u xoojinayo tayaynta adeeg-bixinta hay'adaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

Nuqulka Wargeyska ee bishani wuxuu iftiiminayaa qaar ka mid ah dadaalladaas, sida ka-qaybgalka Soomaaliya ee Maalinta Aqoonsiga Adduunka, iyo madasha Jaamacadda Banaadir iyo NIRA taas oo ardaydu ku soo bandhigeen aragtiyahooda ku saabsan helitaanka adeegga iyo kalsoonida dadweynaha. Mid kasta oo ka mid ah dhacdooyinkani waxay ka tarjumayaan guulaha la gaaray iyo dadaallada socda ee si joogto ah lagula falgelayo shacabka. Ugu dambayntii, waxaan aaminsannahay in dhallinyaradu ay door muhiim ah ku leeyihiin geeddi-socodka taabagelinta Nidaamka Aqoonsiga Qaranka. Doorkoodu keliya kuma koobna is-diiwaangelinta, balse waxay sidoo kale ka qayb-qaataan wacyigelinta, xoojinta kalsoonida iyo aaminaadda dadweynaha, taas oo udubdhexaad u ah inaan diiwaangelinno muwaaddin kasta oo Soomaaliyeed.



**Cabdiweli Cali
Cabdulle (Timacadde)**

Maareeyaha Guud, NIRA

Soomaaliya oo Xustay Maalinta Aqoonsiga Adduunka

Hay'adda NIRA ayaa 16-kii Sebtembar, dalalka caalamka kala qayb-qaadatay Maalinta Aqoonsiga Adduunka oo ah munaasabad loo asteeyay xuska xaqqa aasaasiga ah ee qof kasta uu u leeyahay helitaanka aqoonsi sharci ah.

Maareeyaha Guud ee NIRA, Mudane Cabdiwali Cali Cabdulle (Timacadde), oo muhiimadda Maalinta Aqoonsiga Adduunka ka hadlaya ayaa yiri: "Xuska Maalinta Aqoonsiga Adduunka waxay na xasuusinaysaa in aqoonsigu uu xambaarsan yahay ujeeddo iyo micne ka weyn bixinta kaar oo keliya. Aqoonsigu waa furaha adeegyada, fursadaha, iyo ka qayb-qaadashada arrimaha dhaqan-dhaqaale ee dalka."



Hay'adda NIRA waxay mustaqbalka dhow hiigsanaysaa in la diiwaangeliyo muwaaddin kasta oo Soomaaliyeed, si waafaqsan Yoolasha Horumarka Waara ee Qaramada Midoobay, gaar ahaan bartilmaameedka (16.9) ee ku aaddan in qof kasta helo aqoonsi sharci ah marka la gaaro sannadka 2030.

Maareeye Ku-xigeenka Guud ee Hay'adda, Mudane Cabdiraxmaan Siciid Axmed, oo isna farriin u diray shacabka Soomaaliyeed ayaa yiri: "Maalintan Aqoonsiga Adduunka awgeed, waxaan ku boorrinaynaa dadweynaha Soomaaliyeed inay ka qayb-qaataan hindisaha qaran ee lagu taaba-gelinayo baahinta Nidaamka Aqoonsiga Qaranka. Fadlan isdiiwaangeli oo ku dhiirrigeli qoyskaaga, saaxiibbadaada, iyo bulshada qaybaheeda kala duwan inay is-diiwaangeliyaan."

NIRA oo fulinaysa qorshaheeda ku aaddan in muwaaddin walba oo ku nool dalka gudihiisa iyo dibaddiisa uu helo Aqoonsiga Qaranka ayaa dhawaan, iyada oo kaashanaysa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed, daahfurtay hindise adeegyada aqoonsiga lagaga hirgelinayo ilaa 30 safaaradood oo ku yaal dalalka ay ku badan yihiin qurba-joogta Soomaaliyeed.

Madasha Dhallinyarada ee Jaamacadda Benaadir

23 Sebtembar, NIRA iyo Jaamacadda Benaadir waxay qabteen Madal Dhallinyaro oo loogu magac-daray: **"Aragtida Dhallinyarada iyo Aqoonsiga Qaranka."**



Maareeye Ku-xigeenka Guud, Cabdiraxmaan Siciid Axmed, oo furay madasha ayaa xusay in Aqoonsiga Qaranka uu muhiim u yahay helitaanka adeegyada aasaasiga ah sida waxbarashada, caafimaadka, bangiyada, iyo adeegyada kale ee muhiimka ah. Wuxuu ugu baaqay ardayda jaamacadaha iyo dhallinyarada Soomaaliyeed inay door firfircoon ka qaataan wacyigelinta iyo dardargelinta diiwaangelinta qaran.

Guddoomiyaha Jaamacadda Benaadir, Prof. Maxamed Maxamuud Xasan "Biday," ayaa isna dhankiisa sheegay in Benaadir ay ahayd jaamacaddii ugu horreysay ee martigelisa xarun diiwaangelin oo NIRA leedahay, isaga oo ku dhiirri-geliyey ardayda inay ka qayb-qaataan wacyigelinta dadweynaha si loo xaqiijiyo yoolka ah in la diiwaangeliyo dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed.

Barnaamijka waxa sidoo kale oo qayb ka ahaa soojeedinno ay sameeyeen mas'uuliyiinta NIRA, kuwaas oo ardayda ku wacyigeliyay waajibadka hay'adda, muhiimadda, iyo faa'iidooyinka Aqoonsiga Qaranka.

Ugu dambayntii, kulanka waxa lagu soo gebagabeeyay dood furan oo ay ka qayb-galeen mas'uuliyiinta NIRA, iyadoo weydiyey su'aalo ku saabsan diiwaangelinta, ilaalinta xogta, iyo baahinta adeegyada aqoonsiga.

NIRA oo Ka Qaybgashay Bandhigga Saddex Guurada "Dan Qaran"



Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Qaranka (NIRA) ayaa, 17-kii bishii Sebtembar, si weyn uga qayb-gashay xuska Sannad-Guurada Saddexaad ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ee Dan Qaran iyo Bandhigga Waxqabadka 2022–2025, iyada oo madasha ku soo bandhigtay horumarka baaxadda leh ee laga sameeyay baahinta Nidaamka Aqoonsiga Qaranka ee Soomaaliya.

Intii ay socotay munaasabaddu, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Xasan Sheekh Maxamuud, oo ay weheliyaan Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka, Mudane Xamse Cabdi Barre, iyo Ra'iisul Wasaare Ku-Xigeenka Xukuumadda, Mudane Saalax Axmed Jaamac, ayaa booqday goobta loo asteeyay Hay'adda ee Madasha Bandhigga.

Maareeyaha Guud ee NIRA, Mudane Cabdiweli Cali Cabdulle (Timacadde) oo uu weheliyo Ku-xigeenka Maareeyaha Guud, Mudane Cabdiraxmaan Siciid Axmed, ayaa madaxda qaranka la wadaagay warbixin dhammaystiran oo ku saabsan guulaha ay hay'addu gaartay saddexdii sano ee la soo dhaafay iyo qorshayaasheeda mustaqbalka.

Hay'adda NIRA ayaa ku guulaysatay in ay diiwaangeliso ku dhowaad nus milyan qof tan iyo markii la daahfuray Nidaamka Aqoonsiga Qaranka bishii Sebtembar ee sannadkii 2023, iyada oo sidoo kalena hirgelisay kaabayaasha asaasiga ah sida mashiinnada daabacaadda, xarumaha, qalabka diiwaangelinta, kaararka, nidaamyada eAqoonsi, Hubiye, Shahaado-bixinta (CDS), iyo shaqaalaysiinta hawl-wadeennada laf-dhabarta u ah taabagelinta nidaamka Aqoonsiga Qaranka.

Dib-u-milicsiga Khudbaddii Madaxweynaha ee Tiirdhexaadnimada Aqoonsiga Qaranka

Intii lagu guda-jiray munaasabaddii Waxqabadka DanQaran, Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud oo kahadlaya muhiimadda Aqoonsiga Qaranka ayaa ku sifeeyay mid udub-dhexaad u ah horumarka dalka isla markaana fududaynaya helitaanka adeegyada kala duwan.

Madaxweynaha ayaa sidoo kale xusay in Aqoonsigu muwaaddin kasta u astaynayo Tirsi ama Lambar u gaar ah oo lagu garto inta uu nool yahay, taas oo xaqiijinaysa in dalku yeesho aqoonsi midaysan oo ka qayb-qaata sugidda ammaanka iyo tayaynta adeegbixinta. Madaxweynuhu wuxuu hoosta ka xarriiqay in aqoonsigu laf-dhabar u yahay helitaanka adeegyada muhiimka ah sida waxbarashada, caafimaadka, bangiyada, baasaboorrada, iyo shatiyada ganacsiga.

Ugu dambayntii, Madaxweynaha oo faahfaahinaya muhiimadda Kaarka Aqoonsiga Qaranka ayaa xusay "Aqoonsi la'aan ma safri kartid – diyaarad iska dhaaf e, gaari xitaa ma raaci kartid.

Kaarka Aqoonsiga Qaranku waa aqoonsigaaga rasmiga ah iyo furaha adeegyada dalka Ha sugin berri, maanta isdiiwaangeli oo qaado "Kaarka Aqoonsiga Qaranka oo ah xaqaaga iyo mustaqbalkaaga"



NIRA oo Xarun Cusub ka Furtay Degmada Heliwaa ee Gobolka Benaadir

Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Qaranka (NIRA) ayaa 22-kii Sebtembar xarun cusub oo diiwaangelin ka daahfurtay Degmada Heliwaa ee Gobolka Benaadir, taas oo ay si wadajir ah xarigga uga jareen Maareeye Ku-Xigeenka Guud ee NIRA, Mudane Cabdiraxmaan Siciid Axmed, Guddoomiye KuXigeenka Amniga iyo Siyaasadda Gobolka Benaadir, Mudane Maxamed Axmed Diiriye (Yabooh), iyo Guddoomiyaha Degmada Heliwaa, Mudane Cabdifataax Maxamed Xareed.



Intii lagu guda-jiray munaasabadda furitaanka, Maareeye Ku-Xigeenka Guud ee NIRA, Guddoomiye Ku-Xigeenka Amniga iyo Siyaasadda Gobolka Benaadir, iyo Guddoomiyaha Degmada ayaa ugu baaqay shacabka Heliwaa inay ka faa'iidaystaan adeegyada xarunta cusub isla markaana isu diiwaangeliyaan Kaarka Aqoonsiga Qaranka, iyaga oo hoosta ka xariiqay in Aqoonsigu uu fure u yahay helitaanka adeegyada aasaasiga ah sida waxbarashada, baasaboorka, bangiyada, iyo socdaalka gudaha dalka.

Xaruntan joogtada ah ee cusub ayaa noqotay tii 15-aad ee laga hirgeliyo degmooyinka kala duwan ee magaalada Muqdisho, taas oo muujinaysa sida ay NIRA uga go'an tahay baahinta adeegyadeeda iyo xaqiijinta in muwaaddin kasta oo Soomaaliyeed uu helo aqoonsi xambaarsan Tirsi aan is-beddeleyn

Shirweynaha Aqoonsiga Qaranka Soomaaliya 2025



NIRA waxay dhammaadka sannadkan martigelin doontaa Shirweynaha 2aad ee Aqoonsiga Qaranka Soomaaliya kaas oo 24-25 Nofeembar ka qabsoomi doona magaalada Muqdisho.

Shirku wuxuu isu keeni doonaa masuuliyiinta dowladda, wakiillada hay'adaha horumarinta, bulshada rayidka, khubarrada, aqoonyahanka, iyo ganacsatada kala duwan si loo lafaguro horumarka laga sameeyay hirgelinta Nidaamka Aqoonsiga Qaranka, loogana doodo casriyaynta mustaqbalka ee aqoonsiga Soomaaliya.



Shirku wuxuu noqon doonaa madal la isku weydaarsado waayo-aragnimada la xiriirta istaraatiijiyadaha diiwaangelinta baahsan, lagu soo bandhigo hal-abuurrada dhijitaaka ah ee cusub, laguna falanqeeyo sidii Aqoonsiga loo gaarsiin lahaa bulshooyinka ku nool deegaannada durugsan, iyo qaybaha nugul ee dadweynaha.





WWW.NIRA.SO
INFO@NIRA.GOV.SO
MEDIA@NIRA.GOV.SO



CALL CENTER

169



@nirasomalia